# Tallaalka COVID-19 ee Xoojiyaha (Booster) ah

Markii u dambeysay ee dib u eegis lagu sameeyo - 20 Janaayo 2022

Somali | Soomaali

## Wixii ku saabsan tallaalka xoojiyaha ee COVID-19

Tallaalka COVID-19 **ee xoojiyaha ah (booster)** waa qiyaas kale oo tallaalka COVID-19 ah isla markaasna la bixiyo marka aad dhammaysatid taxanaha tallaalka asalka ah (dadka badidood oo ah 2 qiyaas), oo uu difaaca fayrasku **hoos u dhac ku yimaado muddo kabacdi.**

## Waa maxay sababta ay tahay inaan u qaato xoojiyaha?

Marka difaacista labada qiyaasood ee tallaalada hore ay yaraato mudo ka dib, qiyaasta xoojiyaha waxay kordhisaa awooda ka-hor-taga:

- caabuqa keena COVID-19
- cudur daran
- inaad u dhimatid COVID-19

Talada hadda jirta ayaa ah in taxanaha tallaalka ee bixiya ka hortagga ugu badan ee COVID-19 uu yahay saddex-tallaal: laba qiyaasood oo asal ah iyo xoojiye 3 bilood ka dib dadka badankood.

## Yaa heli kara tallaalka xoojiyaha ah?

Qiyaasta tallaalka xoojiyaha (booster) ah ayaa laguu heli karaa haddii aad ka weyn tahay 18 oo aad qaadatay qiyaastaada labaad ee tallaalka COVID-19 in ka badan saddex bilood ka hor.

## Yaan loo baahnayn inay qaataan xoojiyaha?

Waqtigan xaadirka ah, dadka soo socdaa waa inaysan helin xoojiye:

- dadka da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 17 sano
- dadka difaaca jirkoodu aad daciif u yahay isla markaasna hore u qaatay qiyaas saddexaad.

## Tallaalka xoojiyaha ma lacag la'aan baa?

Haa.

## Waa maxay farqiga u dhexeeya xoojiye iyo qiyaasta saddexaad?

Dadka habka difaaca jidhkoodu aad daciif u yahay ayaa laga yaabaa inuu dhakhtarkoodu u sheegay inay qaataan qiyaas dheeraad ah oo tallaal ah, oo loo yaqaan qiyaasta saddexaad. Tan waxa u sabab ah, tusaale ahaan, haddii ay kuu socoto daawaynta kansarka ama mar xubin (organ transplant) jir laguu galiyay. Qiyaastan dheeraadka ah waxaa loogu talagalay in kor loogu qaado ka jawaab celinta difaaca jirka ku jawaab celinayo tallaalladoodii ugu horreeyay ee dadka difaaca jirkoodu aad daciifka u yahay. Tani waxaa sabab u noqon karta habka difaaca jidhkooda oo aan aad ugu fiicneen inuu ka ilaaliyo fayraska ama jirrooyinka kale.

VICTORIA State Government | Health and Human Services
City of Port Phillip
City of Stonnington
StarHealth First for your Health & Wellbeing

## Goorma ayaan heli karaa xoojiye?

Waxaad ballansan kartaa qiyaasta tallaalka xoojiyaha ah haddii ay ka soo wareegtay saddex bilood ama ka badan markii aad qaadatay qiyaastaadii labaad ee tallaalka COVID-19.

Waxaad taariikhdaas ku hubin kartaa adiga oo eegaya shahaadadaada tallaalka, ka dibna ku dar 3 bilood. Tusaale ahaan, haddii aad qaadatay qiyaastaada labaad 23kii Noofeembar, waxaad xaq u yeelan lahayd xoojiyaha 23-da Febraayo.

## Sida loo helo tallaalka xoojiyaha

Waxaad ka heli kartaa qiyaasta xoojinta COVID-19 xarumaha waaweyn ee tallaalka ee Melbourne, GP ama farmashiistaha tallaalka bixiya. Mid ka mid ah goobahaan waa rugta caafimaadka StarHealth ee Prahran Town Hall.

Waxaad wici kartaa 1800 675 398 si aad u ballansatid qaadashada tallaalka xoojiyaha ah ama si aad u weydiisid meesha aad ka heli kartid adoon balan sameysan.

## Tallaalkee ayaan u heli doonaa xoojiye?

Dadka intooda badan waxay u heli doonaan tallaalka Pfizer xoojiye ahaan. Waxaad si badbaado leh u heli kartaa qiyaastan xoojinta ah ee Pfizer iyada oo aan loo eegayn nooca tallaalka COVID-19 ee aad hore usoo qaadatay.

Tallaalka AstraZeneca waxaa loo isticmaali karaa qiyaas xoojin ah haddii:

- aadan qaadan karin tallaalka mRNA sababo caafimaad awgood, ama
- aad horay usoo qaadatay laba qiyaasood oo ah tallaalka AstraZeneca.

Haddii aadan hubin qiyaasta xoojinta ee aad u qalantid, la hadal GP.
Waxyeellooyinka (side effects) caadiyan ka dhasha, ee iska sahlan qaadashada qiyaasta xoojinta ka dib waxay la mid yihiin waxyeellooyinka ka dhasha labada qiyaasood ee hore.

## Tallaalkeyga xoojiyaha ah maka soo muuqan doonaa shahaadada tallaalka?

Shahaadadaada tallaalka ee dhijitaalka ah ayaa la cusbooneysiin doonaa marka aad qaadatid qiyaas kasta oo tallaal ah. Taasi way kujirtaa qiyaas saddexaad haddii difaacaha jirkaagu aad daciif u yahay, ama qiyaasta tallaalka xoojiyaha.
Haddii aad u baahan tahay daabacaad cusub oo nuqul ka mid ah shahaadadaada, waxaad ka codsan kartaa xafiiskaaga Medicare ka, ama dhakhtarkaaga guud ama farmashiistaha ayaa sidoo kale ku caawin kara.

Qiyaasta tallaalka xoojiyaha waxay sidoo kale ka muuqan doonaan Diiwaanka Tallaalka Australia (Australian Immunisation Record).

### Qaadashada tallaalka xoojiayaha ma qasab baa?

Maya. Uma baahnid inaad qaadatid qiyaas tallaal oo xoojin ah, laakiin waa lagugu dhiirigelinayaa inaad qaadatid si ay kaaga caawiso xoojinta difaaca jirka ee ka hortaga COVID-19.

### Ma inaan u sheego qofka aan u shaqeeyaa haddii aan qaatay tallaalka xoojiyaha ah?

Maya. Hadda looma baahna inaad qofka aad u shaqeysid u sheegtid tallaalkaaga xoojiyaha ah ama qiyaasta saddexaad haddii aad ka shaqeysid meel tallaalka COVID-19 uu waajib ka yahay.

### Waxaan u baahanahay macluumaad dheeri ah.

Meesha ugu wanaagsan ee laga heli karo macluumaadka ku saabsan xoojiyeyaasha iyo tallaalada nooc kastaba ha ahaatee waa GP-gaaga ama farmashiistaha xaafadaada.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xoojiyaha COVID-19 adiga oo wacaya 1800 675 398 ama booqo website kan: https://www.health.gov.au/initiatives-and-programs/covid-19-vaccines/getting-your-vaccination/booster-doses




